


Maqaarkaaga

Lakabyada Maqaarkaaga

Maqaarkaagu waa xubinta ugu weyn jidhkaaga. Waxa uu daboolaa jidhkaaga oo dhan! Maqaarkaaga waxa uu jidhkaaga ka badbaadiyaa deegaanka.



Maqaarkaagu Waxa Uu Leeyahay Saddex Lakab

• Maqaarka Sare (Epidermis)

Kani waa lakabka dibadda ee aad arki kartid taaban kartidna.

• Maqaarka Dhexe (Dermis)

- Lakabkani waxa uu ku hoos qarsoon yahay maqaarka sare. Ma arki kartid.

Lakabkan, waxa laga helaa waxyabaha ay ka mid yihiin:

- xidido dhiig: Waxay nafaqo u keenaan maqaarkaaga si uu caafimaad ugu jiro.
- dhammaadyada dareemeyaasha: Waa ay maskaxdaada u sheegaan sida uu yahay dareenka wax ama shay marka aad taabatid.
- qanjidhada dhididka: Waxay sameeyaan dhidid si uu kaaga caawiyo inaad qabowdid haddii aad si weyn u kululaatid.

• Maqaarka Hoose (Subcutis)

Kani waa maqaarka ugu dambeeya. Waxa uu badi ka kooban yahay baruur ama dufan. Waa uu kaa caawiyaa inaad diiranaatid waxana uu kaa badbaadiyaa dhicitaannada ama jugta.